**DEKERETADA BAARLAMAANKA L. 1 ee 31 maarso 1964**
**Xeerarka Habka Ciqaabta Ciidamada ee Nabadda iyo Dagaalka**[1]

**Qod. 1.**

Lifaaqa Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada Nabadda iyo dagaalka waa la meelmariyay, wuxuuna dhanqan galayaa 15 cisho ka dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

**Qod. 2.**

Nuqul ka mida Xeerka Habka Ciqaabta Ciidamada Nabadda iyo Dagaalka oo lagu faafiyay Faafinta Rasmiga waxaa loo gudbinayaa Guddoomiye Gobol kasta iyo Guddoomiye Degmo kasta, iyo sidoo kale dawlad Hoose kasta, si loogu hayo loogana daalacdo xaafiisyadooda 15 cisho ee ku soo wajahan, si cidkasta ay u ogaato.

**Qod. 3.**

Laga soo bilaabo taariikhda uu dhaqangalo Xeerka Habka Ciidamada ee Nabadda iyo Dagaalka waxaa la nasakhay Xeerarka Habka Ciqaabta Ciidamada ee horay u jirey iyo xeer kasta ee ka soo horjeeda ama aan la jaanqaadi karin.

---

[1] Faafin rasmi oo dheeri ah, L.5. biis ilaa L. 3, 31 Maarso 1964.

**BUUGGA KOOBAAD**
Xeerka habka ciidamada ee nabadda iyo dagaalka

**CINWAANKA 1AAD**
Axkaamta Gogol-xaarka

**1.** *Dabbaqidda Axkaamta Xeerka Habka Ciqaabta* – Haddii aanu xeerku si ka duwan u dhigin, Axkaamta Xeerka Habka Ciqaabta, waxaa la dhowrayaa xitaa habraacyada dacwadaha Maxkamadda Ciidamada horyaalla, ku-xigeennada:

a) Maxkamadda Gobolka (1x.h.c.;1, 3 X. N), Maxkamadda Ciidamada (2.XNGM).

b) Maxamadda Sare (1 x.h.c; 1 3, XNG(I c.p.p.; 1, 5 X.N.G); Maxkamadda Sare ee Ciidamada (1, 3 XNGC);

c) cabashada loo qaato Maxkamadda Sare, cabashada lagu weydiisanayo baabi'inta xukunka Maxkamadda Sare (43);

d) cabashada ku socota garsooraha iqtisaaska u leh, Guddoomiyaha Maxkamadda, ama garsooraha xiririha *(2X.n.g.c)*;

e) Xeer Ilaaliyaha Guud Maxkamadaiyo Ku-xigeennada Xeer Ilaaliaha Guud (12 x.h.c, 7 X. N.G) gaar ahaan Xeer ilaaliyaha guud ee Maxkamadda Ciidamada iyo Ku-xigeennada Xeer Ilaaliyaha Guud ee Maxkamadda Ciidamada.

**CINWAANKA 2AAD**
Adeegsiga garsoorka ciidamada

**Cutubka1aad**
Garsoorka ciidamada

**2.** *Garsoorka ciidamada marka loo eego qofka iyo dambiyada ciidamada*. – Maxkamadda Ciidamada ayaa leh awoodda qaadista dambiyada ciidamada oo ay galaan dadka lagu qaadi karo sharcigu ciidamada sida ku xusan qod. 1aad ee Xeerka Maxkamadda Ciidamada.

**Cutubka 2aad**
Saamaynta isku-dhafka uu ku yeelanayo dacwadaha garsoorka maxkamadda ciidamada

**3.** *Saamaynta isku-dhafka uu yeelanayo dacwadaha*. – Marka uu jiro isku-dhaf, sida ku xusan qod. 6 Xeerka Habka Ciqaabta, haddii dambiyada qaarkood ay galayaan awood qaadista Garsoorka Ciidamada, awood qaadista dambiyada idil oo ay galaan ciidamada waxaa leh Garsoorka ciidamada, xitaa haddii dambiga hortiis ay lumiyeen sifaha ciidannimada. Dambiyada idil oo ay galaan dadka ka baxsan Ciidanka Qalabka Sida waxaa qeexaya xarfaha a) iyo b) ee qod. 7 ee Xeerka Habka Ciqaabta.

**CINWAANKA SADDEXAAD**
Axkaam Guud

**Cutubka 1aad**
Dacwadaha /Falalka

**4.** *Rasminimada dacwadda ciqaabta.* – 1. Dambiyada ku lugleh garsoorka ciidamada, dacwadda ciqaabtu waa mid caama, haddii aan looga baahnayn codsi (81 x.c; 21 x.h.c.), xaafiis ahaan ayaa la bilaabayaa kadib marka la helo warbixinta, dhaawac muujinta iyo ashtakada ama macluumaad kale ee dambiga.

2. Dambiyada lagu mutaysan karo xabsi ciidan oo aan ka badnayn ugu badnaan laba sano, dacwadda ciqaabta waxaa lagu bilaabi karaa codsi ka yimaada taliyaha ciidanka ama sarkaal kale oo isaga ka wakiila[2].

Kuwa aan ciidamada ka tirsanayn codsi looganma baahna. Sikastaba haddii uu jiro dambi la wada galay (50; 71 x.c) waxaa xitaa lagu socodsiinyaa dacwadda kuwa aan ciidanka ka tirsanayn haddii codsiga laga keenay mid dambiga kula jiray.

**5.** *Dacwadaha madaniga oo ku saabsan wax isu soo celinta iyo magdhowga dhibaatada* – dacwadaha madaniga lama horgeyn karo Maxkamadaha Ciidamada. Garsooridaas iyada waa la joojinayaa illaa laga gungaaro dacwadda ciqaabta (14 x.h.c).

**Cutubka 2aad**
Garsooraha

**Qaybta 1aad**
Xubnaha garsoorka ciidamada

**6.** *Axkaamta Guud.* – Xeerka la xariira Xeerka Nidaamka Garsoorka Ciidamada wuxuu qeexayaa noocyada, inta ay ka koobanyihiin iyo tirada xubnaha qabanaya garsoorka ciidamada.

**Qaybta 2aad**
Isqabsiyada garsoorka

**7.** *Isqabsiyada garsooridda.* – Isqabsiyada hay’adaha garsoorka caadiga iyo hay’adaha garsoorka ciidamada waxaa go’aan ka gaaraya Maxkamadda Sare.

**Qaybta 3aad**
**Isla jaanqaadis la’aanta garsooraha**

**8.** *Dabaqidda axkaamta Xeerka Habka Ciqaabta.* – Wixii ku saabsan isla jaanqaadis la’aanta garsooraha ciidamada, waxaa la dabbaqayaa Xeerka Habka Ciqaabta (10,11 x.h.c), arrimaha la xarriir isla jaanqaadis la’aanta, marka laga reebo qodobka soo socda:

**9.** *Isla jaanqaadis la’aanta gaarka ee dacwadaha ciidamada.* – Marka laga yimaado xaaladaha qodobka

---
[2] Sida ku cad wax kabaddalka 8 Abril 1970 l. 19

10 Xeerka Habka Ciqaabta, kama mid noqon karo Maxkamadda Ciidamada ama Maxkamadda Sare Ciidamada, ama qabashada xilka Dadweyne U- Doodaha:

*a)* dhibanaha dambiga loo geysta;

*b)* saraakiisha horinta, ama qaybta uu ka tirsanyahay eedaysanuhu, saraakiisha horay ka qaybgalay dacwad anshax-marin isla falkaas ama sikastaba si toosa ugu lugyeeshay cadaadinta anshaxmarineed isla falkaas;

*c)* saraakiisha sida deg-degga u taagnaa amar siinta eedaysanaha waqtiga eedaysanuhu uu dambiga galay;

*d)* saraakiisha socodsiiyay arrimaha gogol-dhigga marxaadda doodda maxkamadda horteed.

## Cutubka 3aad
Dhinacyada

### Qaybta 1aad
Dadweyne U Doodaha

**10.** *Xilgudashada Dadweyne U Doodaha dacwadda ciqabta.* – Dadweyne U dooduhu wuxuu ka bilaabayaa Maxkamadda Ciidamada dacwadaha ciqaabta quseeya dambiyada garsoorka ciidamada (69 x.h.c. c).

**11.** *Xilka Xaafiiska Dadweyne U Doodaha.* – Xaafiiska Dadweyne U Dodaha (5 X.N.G. C):

*a)* wuxuu ilaaliyaa dhowritaanka xeerarka;

*b)* wuxuu fuliyaa qaraarrada Maxkamadda Ciidamada iyo garsooraha xiriiriyaha ah;

*c)* wuxuu fuliyaa wax allaale wixi waajibaad xeerku uu siinayo iyo nidaamyada ciidamada oo lagu meelmariyay Dekeretada Madaxweynaha Jamhuuriyadda (8 X.N.G).

### Qaybta 2aad
Qareenka

**12.** *Qareennada.* [(1)]– 1. Dacwadaha Maxkamadda Ciidamada horteeda qareenku waa in uu ahaadaa muwaadin Soomaaliyeed.

2. Haddii loo baahdo ilaaalinta sirta, siyaasadda ama midda ciidanka Garsooraha xiririyaha ah ama Guddoomiyha wuxuu meesha ka saari karaa qareenka xirfadlaha ama khabiirka aan ciidanka ahayn ka dib markii uu qaato qaraar aan duris laga qaadan karin.

**13.** *Xeerka nidaamiya qareenada ciidamada.* – 1. Qareenka ciidanka ka tirsan, ee xaafiis ahaan la magacaabay ama eedaysanuhu soo xushay, ma diidi karo xilka haddii aanay jirin sabab macquula. Haddii ay jiraan sababo macquula Guddoomiyaha Maxkamadda wuxuu iqtiyaar u leeyahay in uu ka aqbalo diidmada.

2. Haddii diidmada qareenka ciidamada aanay lahayn cudurdaar macquul ah, isla Maxkamadda Ciidamada ayaa ku ridaysa ciqaab qaab anshax-marin ah, taaso sida uu qabo nidaamku uu ku ridi karo taliyaha ugu sarreeya.

3. Qareenka ciidanka, xitaa haddii uu soo xusho eedaysanuhu haddii uu ka aqbalo abaalgud kasta, qaab kasta ha ahaado oo la xariira gudashada xilka diffaaca waxaa lagu qaadi karaa tallaabo anshax-marin, iyadoo aan meel looga dhacayn dacwadda ciqaabta haddiiba arrintu aanu dambi ka ratimayn.

---

[(1)] difaacayaasha dacwadaha iyo maxkamadda horteeda, eeg qodobka 15aad iyo 16aad c.p.p.

**14.** *Nidaamka qareennada aan ciidamada ahayni.* – 1. Arrimaha liddiga ku ah qareennada aan ciidanka ka mid ahayn, oo ka taga difaaca, waxaa la lagu qaadayaa qaraar uu soo saaro Guddoomiyaha Maxkamadda Ciidamada, ciqaabta ku qoran Xeerka Habka Ciqaabta (16 x.h.c.).

2. Qaraarkaas waxaa cabasha looga qaadan karaa Maxkamadda Sare Ciidamada, xitaa dulucda wixi la xariira dhinaca danta ka leh.

3. Warbixinta Cabashada, oo ay wehliyaan sababaha waa in lagu keenaa saddex cisho gudahood oo ka soo bilaabata marka la soo wargeliyay qaraarka.

4. Haddii eedaysanuhu, uu noqdo diffaac la'aan, kadib markii la baylixiyay, Guddoomiyaha wuxuu u magacaabayaa sarkaal qareen xaafiis ahaan. Waxaa kaloo la siin karaa ugu badnaan muddo shan cisho si uu ugu diyaargaroobo difaaca. Doodda dacwadda lama hakin karo muddo intaas ka badan, dibna looma dhigi karo sababa la xariira baylixidda diffaaca.

**Cutubka 4aad**

Tallaabooyinka habraacyada

**15.** *U hoggaansanaanta tallaabooyinka habraacyada.* – Dacwadaha la xariiira ikhtisaaska Awoodda Garsoorka Ciidamada, waa in la dhowraa shuruucda ku qoran Xeerkaan, iyadoo la dabbiqi karo Xeerka Habka Ciqaabta, xitaa marka dhowrid la'aantu aanay sababayn wax kama jiraanimada ciqaab kale oo gaara

**16.** *Bixinta nuqullada, soo haraaga ama shahaadooyin.* – Bixinta nuqullada, soo haraaga ama shahaadooyinka dokumrntiyada qaarkood waxaa oggolaan kara Garsooraha xiriiryaha ama Guddoomiyaha Maxkamadda keliya.

**17.** *Wargelinta tallaabooyinka.* – Haddii xeerku aanu si ka duwan u dhigin, wixii ku saabasan wargelinta tallaabooyinka waxaa la ilaalinayaa Xeerka Habka Ciqaabta. Xilka gaarsiiyaha Maxkamadda waxaa qabanaya askar uu u xilsaaro Taliyah Xoogga Dalka (51. x.h.c).

**18.** *Wargelinta askarta markhaati ahaan loogu yeero.* – 1. Wargelinta askarta ciidmadaa qalabka sida ka mida ee markhaati ahaan looga yeeray Maxkamadda Ciidamada waxaa lagu fulinayaa ogaysiis qoraala caadi ah ama telegraam, oo loo dirayo Madaxda fulinaysa ee taliska ciidanka uu ka tirsanyahay. Taliyaha isaga ah wuxuu si daahid la'aana ugu gudbinaya Masuuliinta fulinaysa caddaynta arrinta yeeritaanka

2. Haddii loo baahdo arrima gaara oo deg-degga, ciidamada qalabka sida ee hawsha ku jira oraah ahaan ayaa loogu yeeri karaa, xitaa telefoon, loo sii marinayo madaxdiis tooska ah, oo u xilsaaran wicitaanka deg-degga.

3. Haddii askartu ay fasax ku jiraan ama ay ku suganyihiin goob ka baxsan ciidankooda, ogaysiiska waxaa loogu dhiibayaa taliyaha saldhigga Boliiska goobtaas, kaaso isla markiiba warbxintiisa u diraya Masuuliinta soo diray (80 x.h.c.).

**CINWAANKA 4AAD**
Habraaca doodda hordhaca ah iyo garsooridda

**Cutubka 1aad**
Axkaam guud

**Qaybta 1aad**
Tallaaboyinka gogol-xaarka

**19.** *Dadka haya xilka boliiska garsoorka ciidamada.* Dambiyada garsoorka ciidamada, hawsha boliiska garsoorka, sidan ayaa loo qabanayaa: – 1. Wixii ku saabsan dambiyada garsoorka ciidamada, xilka boliiska garsoorka waxaa loo qabanaya habka soo socda:

a) taliyayaasha qaybaha, kuwa ka go'an, ama meeshooda uga mida Xoogga Dalka
b) saraakiisha iyo saraakiil xigeenad Boliiska Milletariga;
c) ciidan kasta oo ka tirsan taliskiisa oo loo xilsaaro, taliyihiisa qudhiisa ama xeer ilaalinta ciidankada.

2. Haddii ciidamo badan ay ka midyihiin kuwa lagu soo sheegay faqradda hore a) iyo b), hawsha waxaa qabanaya kan ugu daraja sarreeya ama haddii ay isku daraja yihiin midka ugu darajo waayeelsan[1]

3. Ciidamada kor lagu soo sheegay waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay codsadaan ciidanka guud. Si kastaba dhammaan dadka lagu soo sheegay faqradda koobaad, iyadoo aan la hakin baarista waa inay wargeliyaan Xeer Ilaaliyaha Guud ee Ciidamada (23 x.h.c)

**20.** *Hoos imaashaha boliiska meleteriga ee garsoorka.* – Dadka lagu soo sheegay qodobka hore waxay xiilkooda gudanayaan iyagoo ka hoos shaqeynaya Xeer Ilaaliyha Guud Ciidamada iyo Ku-xigeenka Xeer Ilaaliyaha guud Ciidanka, iyagoo dhowraya shuruucda, mid waliba u degsan ee nidaaminaya xiriirrada gudaha sida ay u kala sarreeyaan (12/4 x.h.c).

**21.** *Qabashooyinka, indho-indhaynta ama fatashidda.* – Marka la fulinayo qabashooyinka/xarig, kormeerada iyo baarisyada qofka/goobta, saraakiisha boliiska millerariga waxay ilaalinayaan xeerarka gaarka ee ku qoran qodobbada 30 iyo 35.

**22.** *U gudbinta tallaabooyinka iyo macluumaadka Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidanka.* – 1. Marka hawsha la gabagabeeyo, dadka lagu soo xusay qod. 19 waa in ay si deg-degga u gudbiyaan hawlaha la qabtay iyo waxyaabaha gacanta lagu dhigay Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidanka (26 x.h.c)

2) Dadka lagu soo sheegay faqradda hore waa in ay la socodsiiyaan Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidanka akhbaar kasta ee dib ka timaadda, iyago qabanaya markasta tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu xaqiijinayo muujinta dambiga.

**23.** *Ciqaabta anshxa-marinta dadka fulinaya xilka boliiska mileteriga.* – Dadka lagu soo sheegay qod.19, ee ku xadgudba axkaamta xeerkaan oo aan loo jidayn ciqaab gaara, ka maaga ama daahiya fulinta amar ka soo baxay Hay'adaha Garsoorka Ciidamada, amase fuliya keliya qayb ka mida amase dayaca, waxay mutaysanayaan anshax-marin uga timaadda madaxdooda xakuma, marka uu codsado Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidamada.

**24.** *Hawlaha ay qabanayaan boliiska miletariga.* – Dadweyne U Dooduhu wuxuu si toosa u socdsiin karaa, isagoo adeegsanaya dadka lagu soo sheegay qod. 19 wuxuu iyo u socodsiin karaa tallaabooyinka ay qaadi karaan boliiska mileteriga, sida ku cad qaybta xeerkaan.

**25.** *Caawinta Kaaliyaha.* – Dadweyne U Dooduhu tallaabooyinka idil uu qaadayo waxaa ka caawinaya

---

[1]oo lagu soo saaray, qodobka 3aad, Sharciga 8, Abriil 1964, L. 19

Kaaliyaha.

**Qaybta 2aad**

Xoriyadda Shaqsiga ee eedaysanaha

**26.** *Xarigga lagu qabto dadka dambiga faraha kula jira.* – 1. Dadka lagu soo sheegay qod.19 waa in lagu socdsiiyaa xarigga qofka lagu qabto isago dambiga faraha kula jira (27 x. c.) dambiyada ciidan ee lagu mutaysan karo xarig ama ciqaab ka culus, marka laga reebo qaabka lagu sheegay nidaamyada lagu galayo goobaha ciidamada.

2. Xarigga waxaa laga sameynayaa qoraal-doodeed /maxdar. Xarigga si deg-degga waxaa lala socdsiinayaa Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidamada, iyadoo lagu haynayo si doorasho leh goob ciidan.

**27.** *Xarigga xaaladaha aan dambiga faraha lagula jirin.* – Marka laga reebo xaaladaha aan dambiga faraha lagula jirin (37 x.c) qofka ciidanka ah ee haya shaqada ciidan, oo dambi ku eedaysan, lama xiri karo ama lama joojin karo meelna laguma hayn karo, haddii aan laga wadan amarka qabashada hay'adaha garsoorka; marka laga reebo tallaabada taxaddar leh ee uu qaado taliyaha uu qofka ciidanka ka tirsanyahay.

**28.** *Xarigga goobo gaara oo aan ka tirsanayn Hay'adaha Ciidamada.* – Haddii, xaaladaha ka baxsan dambiga faraha lagula jiro ka dibna la helo amarka garsoorka ciidamada, waxaa lagu socodsiinayaa guri, ama goob kale oo gaara ama meelo aan ka tirsanayn xeryaha ciidamada, xarigga lagu qaadayo garsoorka ciidamada, dadka lagu soo sheegay qod.19 si toosa ayaa loo socodsiinayaa.

**29.** *Xarigga goob shaqo ama goobo kale oo hoos yimaada ciidamada.* – Marka, dambi quseeya garsoorka ciidamada, oo ka baxsan xaaladda faraha kula jiridda dambiga ka dibna amarka qabashada masuulinta garsoorka caadiga ay soo saarto, waxaa lagu xirayaa eedaysanaha ciidanka ah ama aan ciidanka ahayn, xeryaha, maraakiibta, goobaha shaqada iyo goob kasta oo hoos timaadda masuulinta ciidamada, kuwaasoo ay waajib ku tahay in ay u diyaariyan masuuliinta garsoorka.

**30.** *Xaaladaha warqadda qabashada ay waajib tahay.* – Dambiyada uu leeyahay garsoorka ciidamada, oo ay waajib tahay in warqadda qabashada loo gooyo eedaysanha:

*a.* dambi liddi ku aha daacadnimada difaaca ciidamada;

*b.* xubin iska jarid ama iswaalidda si uga baxsado waajibaadka hawlaha ciidanka, kacdoon. gadood ama fallaaganimo ama hurin dambi;

*c.* dambi aan ku talagal ahayn, kaaso xeerku u jidaynayo ciqaab xariga oo aan ka badnayn ugu badnaan saddex sano, ama ciqaab ka sii badan (21).

**31.** *Xaaladaha warqadda qabashada ay iqtiyaari tahay.* – Warqadda qabashada waxaa loo soo goyn karaa eedaysanha gala dambiga aan ku talagalka ahayn, kaaso xeerku u jidaynayo ciqaabta xarig aan ka badnyan saddex sano ugu badnaan.

**32.** *Go'ominta ciqaabta marka loo eego dhaqangalka qodobada la soo sheegay.* – Xisaabinta ciqaabta marka loo eego qodobbada la soo sheegay, waxaa la ilaalinayaa Xeerka Habka Ciqaabta.

**33.** *Fulinta amarrada.* – Amarrada liddiga ku aha qof ciidan ah, si loo fuliyo waxaa loo gudbinayaa Taliyaha ciidanka uu ka tirsanyahay, markabka uu eedaysanhu saaranyahay, waxana eedaysanaha isaga loo gacan gelinaya nuqul ka mida amarka.

**34.** *Inta uu u soconayo xabsiga ku meelgaarka.* – Dambiya garsoorka ciidamada, xabsiga ku meelgaarka kama badnaan karo boqoliyo-siddeetan cisho (47 x.h.c.c.).

**Cutubka 2aad**

Xeerar qubane ah

**35.** *Indho-indhaynta iyo fatashidda goobaha ka tirsan ciidamada.* – Marka la sameynayo indho-indhaynta

ama fatashidda (52 58 x.h.c) xeryaha ciidanka, maraakiibta iyo goobaha kale ee ka tirsan ciidamada, waxaa la ilaalinayaa axkaamta u degsan nidaamka lagu galayo goobaha ciidamadaa, waana inuu goob joog ahaadaa taliyaha ama sarkaal uu soo wakiishay masuul sare ee ciidanka marka madaxda fulinaysa ay lagama maarmaan u arkaan in ay jiraan sababa gaara ee caddaaladeed (21).

**36.** *Tijaabooyinka Garsoorka.* – Dacwadaha dambiyada garsoorka ciidamada waxaa ka mamnuuca tijaabooyinka garsoor oo khal-khal gelin kara shaqada, anshaxa iyo nidamka goobaha ciidamada.

**37.** *Magacaabidda khuburada.* – Marka ay lagama maaarmaan tahay in la magacaabo khabiir, khabiirka waxaa si xulasha leh laga dhex magacaabayaa saraakiisha Ciidamada Qalabka ee Dawladda (157 x.h.c.)

**38.** *La-taliyaasha farsamada.* – Inta ay socoto habraaca doodda-horteed, lama oggola soo dhexgalka la-taliyaal farsamo (161/11 x.h.c.)

**39.** *Isla jaan qaadis la'aanta khuburada.* – Ma noqon karo khabiir xaafiis ahaaneed ama la-taliye farsamo sarkaalka sameeyay warbixinta ama ashtakada gogol-xaarka (38).

**40.** *Magacaabidda turjubaanka.* – Marka ay lagama maarmaan tahay hawsha turjubaanimada, waxaa laga soo xulanayaan saraakiisha Ciidamada Qalabka sida (207 x.h.c).

**41.** *Isla jaanqadis la'aanta turjubaanka.* – Ma qaban karo turjubaan xafiis ahaaneed sarkaalka sameeyay warbixinta iyo ashtakada xitaa haddii uu wax ka socodsiiyay tallabooyinka gogol-xaarka.

**42.** *Xayiraadda lagu fulinayo goobaha ka tirsan Ciidamada.* – Marka ay tahay in xayiraad lagu fulinayo goobo ciidamada ka tirsan hay'adda ciidanka, waxaa la ilaalinayaa si loo galo goobaha ciidamada, nidaamyada u degsan xeerarka. Xayiraadda waxaa la qabaanyaa iyadoo ay goobjoog yihiin masuuliinta ciidanka ama cid ay soo wakiisheen ama sarkaal sare ee ciidanka, haddii masuulinta wax fulinaysa ay la noqoto in ay lagama maarmaan tahay sababa gaara ee caddaaladeed awgood.

## CINWAANKA 5AAD
Duridyada

### Cutubka 1aad
Cabashada wax lagu burinayo

**43.** *Sababaha cabashada liddiga ku ah xukunka Maxkamadda Ciidamada.* – 1. Haddii aan xeerku si kale u dhigin, tallaabooyinka liddiga ku ah Garsooraha xiriiriyaha iyo xukunka Maxkamadda Ciidamada waxaa cabasha lagu burinayo ka soo qaadan kara Dadwayne U Doodaha ama eedaysanaha, waxaana looga qaadan karaa Maxamada Sare Ciidamada.

2. Cabashada waxaa looga qaadan karaa sababaha soo socda:

*a)* dhowrid la'aanta ama si khalad u dabiqidda xeerka ciqaabta ama shuruucda kale oo ay mudnayd in la tixgaliyo dabbaqidda xeerka ciqaabta;

*b)* dhawrid la'aanta Garsooraha awood xeerka gaar u ahaa iyo hayadaha xeer dejinta ama maamulka amase aan loo oggolayn awoodaha caamka/guud;

*c)* dhowrid la'aanta xeerarka habraaca oo keenaya burinta, aqbal la'aanta ama mudda dhaafka.

3. Cabashada lama aqbalayo haddii laga keenay sababo aanu xeerku oggolayn ama ay muuqato in ay been yihiin.

### Cutubka 2aad
Durista Tallaabooyinka Maxkamadda Sare Ciidamada ([1])

---

([1]) Lagu badalay qobka 5aad, Sharci 8, Abriil 1970 lamb. 19.

**44.** *Tallaabooyinka idil ee Maxkamadda Sare Ciidama ma aha kuwo duris laga qaadan karo*. Sikastaba Golaha Sare Kacaanka haddii ay la noqoto lagama maarmaan waxay burin karaan Xukunka Maxkamadda Sare Ciidamada.

## CINWAANKA 6AAD
Dib-u-eegista

**45.** *Xeer Guud.* – 1. Xukunka Maxkamadda Ciidamada waxaa lagu samayn karaa dib u-eegis xaaldaha iyo si waafaqsam Xeerka Habka Ciqaabtan (237 x.h.c).

2. Codsiga waxaa la horgeeynayaa Maxkamadda Sare Ciidamada, taaso haddii ay aqbasho dib u-eegista, waxay burinaysaa xukunka, waxayna amraysaa, haddii loo baahdo, in dib celiyo dacwo cusub Maxkamadda Ciidamada ([2]).

## CINWAANKA 7AAD
Fulinta

### Cutubka 1aad
Axkaam Guud

**46.** *Dabbaqidda Xeerka Habka Ciqaabta.* – Marka laga reebo arrinta lagu sheegay Cinwaankaan, wixii ku saabsan fulinta xukunka Maxkamadda Ciidamada waxaa la ilaalinayaa, marka la dabbaqi karo, qaraarada ku qoran Xeerka Habka Ciqaabta, wakiilka Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta ama Wasiirka Difaaca (24 w,s.x x.h.c).

### Cutubka 2aad
Qaraaro gaar ah

**47.** *Fulinta xukunka dilka.* – Xukunka dilka waxaa fulinayaa Masuulinta Ciidanka iyo kolba sida uu dhigayo nidaamyada ciidamada oo lagu meel mariyay Dekereto Madaxweynaha Jamhuuriyadda [3].

**48.** *Fulinta xukunka siyaadada ah.* – Daraja dhimidda, ka xayuubinta derajada, hakinta darajada iyo ka joojinta hawsha, waxaa fulinaya masuulinta ciidamada qaababka lagu sheegay xeerka gaarka iyo nidaamyada ciidamada, ee lagu meelmariyay Dekertada Madaxweynaha Jamhuuriyadda.

**49.** *Dhaqan-celinta.* – 1. Makamadda Sare Ciidamada marka uu codsado qofka la dhaqan-celinayo, sida uu qabo xeerka ciqaabta guud, wuxuu amri karaa go'aan qolka shawrka lagu gaaro, kadib marka uu arko gungaarada Xeer Ilaaliyha Guud Ciidamada, la sameeyo baaritaanada loo arko lagama maarmaan, in saamaynada laga helay dhaqan-celinta lagu siyaadiyo ciqaabta ciidan ee siyaadada iyo saamayn kasta ee ciidan oo xukunku reebi karo

2. Go'aanka waxaa lagu dhawaaqi karaa xaafiis ahaan kadib marka uu codsado Xeer Ilaliyaha Guud Ciidamada.

### Cutubka 3aad
Tallabooyinka hantiyeed ee la xariira waxyaabaha lagu soo qabtay dacwaddda ciqaabta

---

([2]) Awooda dib u eegista oo loo cuskaday golaha kacaanka ugu sarreeya Sharci 5 abriil 1972, Lamb. 38, arag App. 8.

([3]) Arag D. P. C. R. S., 30 October 1969, lamb. 62, (Sharciyo hirglinta jumlada ciqaabta dilka): App. 11.

**50.** *Muranka ka dhasha milkiga hantida la soo qabtay. Iqtisaaska Garsooraha caadiga.* – Haddii lagu murmo lahaanshaha hantida la soo qabtay, go'aanka soo celinta hantidaas waxaa leh Garsoorka caadiga.

**Cutubka 4aad**

Fulinta tallaabada ammaanka

**51.** *Dabbaqidda shuruucda Xeerka Habka Ciqaabta.* – Arrimaha la xariira fulinta tallaabada ammaanka, waxaa la ilaalinayaa shuruucda Xeerka Habka Ciqaabta marka la dabbaqi karo (259 x.h.c.) marka laga reebo cabashada dib u-eegista.

**CINWAANKA 8AAD**

Isu soo-celinta maxaabiista

**52.** *Ka soo celinta dibadda.* – Haddii loo baahdo in dawlad shisheeye la weydiisto soo celinta eedaysane ama qof xukuman, oo ku saabsan dacwad ay iqtisaaskeedu leeyahay Garsoore Ciidan, Xeer Ilaaliyaha Guud Ciidanka wuxuu u dirayaaa codsi Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Diinta isagoo u gudbinayaa dokumentiyada loo baahanyahay (278 x.h.c.).

**BUUGGA LABAAD**

Habraaca ciqaabta ciidamada dagaalka

**CINWAANKA 1AAD**

Garsoorka ciidamada dagaalka

**53.** *Waqtiga bilawga.* – Xaaladda dagaalka waxaa dhaqangalaya garsoorka ciidamada dagaalka ee la xariira dambiyada iyaga ah, kuwaaso la galay kadib markii lagu dhawaaqay xaaladda dagaalka; ama xitaa, ka hor waqtiga dhawaaqa isaga, haddii dacwadda ciqaabta aan weli la bilaabin ama aan weli go'aan laga gaarin.

**54.** *Garsoorka ciidamada dagaalka.* – 1. Waqtiga dagaalka, dekereeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa lagu dhisi karaa Qaybo guur-guura ee Maxkamadda Ciidamada oo lagu magacaabayo Maxkamadda Ciidamada Dagaalka, waxayna iqtisaas u yeelanaysaa dacwadaha dambiyada la xariira garsoorka ciidamada dagaalka. Isla dekereetadaas waxaa lagu jideynayaa shuruucda ku saabsan tirada ay ka koobanyihiin iyo hawlqabadyada qaybta guur-guurta ee la soo sheegay.

2. Maxkamadda Ciidamada Dagaalka waxay qaadaysaa:

*a)* dambiyada dagaal ee cid kasta oo ku gasha dhulka xaaladda dagaaal ama loo qaadan karo kaas;

*b)* dambiyada lagu sheegay xeerka ciqaabta caamka, oo ay dalka ku galaan ciidamada ee lagu soo sheegay faqradda kore;

*c)* dambiyada dagaal oo cid kasta ku gasho dalka dibaddiisa ee lagu soo sheegay xarafka kore, haddii kaas uu ka yimaado dhaawac wax u dhimaya hawlaha ciidanka dagaalka ama hawlaha la xariira, amse dhaqanka guud ee dagaalka;

*d)* dambi kasta oo ay galaan maxaabiis dagaal xil hayay ama Dawladda Soomaaliya gacanta ugu jira,

*e)* dambiyada liddiga ku ah xeerka iyo dhaqanka dagaalka oo ay galaan dad ka tirsan ciidamada qalabka sida ee cadowga.

3. Maxkamadaha Ciidamada ee dagaalka waxay kalo qaadayaan dambi kasta oo ka dhaca goob ka mida meelaha hawgallada ciidan ay ka socdaan amaba loo qaadan kuwaas:

*a)* dadka aan ka mid ahayn ciidamada qalabka sida ee dalka, oo daraja kasta iyo xitaa xiriiro dadban ee adeeg, hawl, waxqabad, maamul, taakulayn, dalabiyo iyo wax la mida la leh ciidamada qalabka sida ee la soo sheegay;

*b)* qof kasta oo u xilsaaran adeeg gaara kana mida dadka lagu sheegay xarafka kore iyo qof kasta oo hawl kasta kula jooga ciidamada qalabka si waafaqsan xeer iyo nidaam lagu meelmariyay Dekerete Madaxweyne ee Jamhuuriyadda.

**55.** *U wareejinta Hay'adaha Garsoorka Caadiga dacwadaha dambiyada caamka.* – Xaaladaha ku xusan xarafka b) faqradda labaad iyo faqradda saddexaad ee kore, garsooraha ciidamada wuxuu amri karaa haddii ay la habboonato in uu u wareejiyo garsoorka caadiga isagoo ku soo saarayo amar aan laga doodi karo sida ku cad habraacyada dambiyada dacwadaha caamka/guud.

**56.** *Marka uu jiro isbiirsiga nooca ciidamanimada iyo noocyo kale.* – Marka noocyada ciidanimada ay isbiirsadaan noocyo kasta, oo eedaysanuhu ku sifoobo, midka hore ayaa lagu go'aminayaaa garsooridda, marka laga hadlaya dambiyada maxkamadda cidamada dagaalka.

**57.** *Dhul qabsiga ciidamada.* – 1. Dhulka Dawladda cadawga oo ay qabsadaan Cidamada qalabka sida ee Dawladda Soomaaliya, Maxkamadda Ciidamada dagaalka ayay u sugnaatay qaadista dambiyada ay galaan dadka dhulka la qabsaday deggan sida ku cad xeerka ciqaabta ciidamada iyo xeerarka ciqabta caamka ee soomaalida oo lagu wayeellaynayo ciidamada qalabka sida ee dhulka la qabsaday ama dadka iyaga ka tirsan ama shaqa ahaan ku tiirsan, ama dambiyada laga galay dadka deggan dhulka la qabsadayay, Maxkamadd Ciidamada dagaaalka ay leh garsooridda dhammaan eedaysanyaasha. Marka ay isku biirsadan hal dambi ama dambiyo isku xiran dadka kor lagu soo sheegay iyo dadka deggan dhulka la qabsaday Maxkamadda Ciidamada ayaa garsooridddeda leh dhammaan eedaysanayaasha.

2. Isla xeerkaas waxaa lagu qaadayaa Ciidamada qalabka sida ee Soomaaliya ee saababa ka duwan dagaalka ku sugan dhulka shisheeye ee la qabsaday.

**58.** *Ciidamada loo diray dhul Dawlad gaashaanbuur lala yahay.* – Marka ciidan qaran uu hawlgal ka fulinayo dal gaashaan-buur la ah Soomaaliya, ama marka ciidamada dawawladda gaashaan-buurta la ah Soomaaliya uu hawlfulin ka qabanayo dalka Soomaaliya waxaa la ilaalinaya xeerarka soo socda, haddii aan si ka duwan aanay labada dawladood ku heshiin:

*a)* waxaa si aan shaki ku jirin lagu dhabbqayaa garsoorka ciidamada uu mid walba hawgalkiisa ciidan uu ka tirsanyahay, dal kasta ciidamadu ha joogaan ama eedaysanayaashu u dhasheen;

*b)* Marka isbiirsiga hal dambi ama ka badane lagu qaadayo garsoorka ciidamada, iqtisaaska wuxuu u sugnaaday Maxkamadda Ciidamada Dalka uu ka tirsanyahay eedaysanuhu;

*c)* si gaara Makamadaha dalka Gaashaanbuursiga lala leeyahay ayaa iska le garsooridda dambiyada ay galaan dadka aan ka mid ahayn Cidamada qalabka sida ee Soomaaliya oo ka dhaca dalka gaashaan buurta la ah Soomaliya, oo gala dambiyo liddi ku ah isla ciidamadaas.

**59.** *Dambiyada lagu galo dal shisheeye.* – Marka laga soo tago xaaladaha la soo sheegay, dambiyada ciidan, ee cid kasta ay ku gasho xilliga dagaalku dal shisheeye, waxa qaadaya garsoorka ciidamada soomaaliyeed, haddiise garsoore shisheeye uu soo saaro xukun, si kastaba, waxaa la ilaalinayaa qodobka 14 Xeerka Ciqaabta Ciidamada.

## CINWAANKA 2AAD

Axkaamta guud ee habraacyada ciqaabta ciidamada dagaalkaa

### Cutubka 1aad

Dacwadda ciqaabta, Guud ahaan

**60.** *Waajibnimada dacwada ciqaabta.* – Qofna laguma ciqaabi karo dambi ka hor inta aan lagu qaadin dacwad ciqaabeed oo waafaqsan qaabka uu xeerku tilmaamayo, marka laga reebo marka xeerka isaga uu sii ka duwan u sheegayo.

**61.** *Mararka si toosa xoog lagu maquunninayo.* – 1. Marka dambiga faraha lagula jiro (37 x.c) dambiyada qaarkood ee amar diidkaa, kala dambayn la'aanta, gadoodka ama kacdoonka amase dambiya la xariira maxaabiis dagaal cadaw, ee lagu sheegay qaar ka mida dambiyada ku sheegan qodobada 383 iyo 387 Xeerka Ciqaabta Maxkamadda Ciidamada, laguna galay markab dagaal dushiis ama dayaard ciidamada, Taliyaha, haddi ay jirto halis uu dambigu sababy oo khatar ku ah ammaanka markabka ama dayaaradda, wax ku oolnimadooda dagaal, si deg-degga ayuu u soo gudbin karaa isagoo hub adeegsanaya kuwa ay ku sifowda in si cad uga masuulyihiin dambigaas.

2. Isla awooddaas waxay u sugnaatay Taliyaha qaybta ciidan ee sababa la xariira dambiyada faqradda kore, ay jiraan halis weyn gelinays qaybta ciidanka ee hoos yimaada taliskiisa.

3. Taliyuhu markasta waa in uu u diraaa warbixin sababaysan ciidanka uu ka tirsanyahay waqtiga ugu dhaqsiyha badan ee suurtagalka ah.

**62.** *Weynta/lumista markabka ama dayaaradda Ciidamada.* – Haddii markabka dagaalka ama dayaaradda ay meesha ka baxaan lama bilaabi karo dacwad ciqaaba haddii taliyaha ugu sarreeya aanu soo codsan.

2. Taliyaha ugu sareeya wuxuu iqtiaar u leeyahay in go'aamiyo in dacwadda dib loo dhigo inta ay ka dhammaanayo xaaladda dagaalka.

**63.** *Hakinta dacwadha ciqaabta.* – 1. Inta lagu jiro xaaladda dagaalka waxaa la hakinayaa dacwadaha ciqaabta la xariira shaqada qaranka ciidamada, shaqa-dayicidda iyo ka baaqsiga wicitaanka ciidamada, marka loo eego in ay ka tirsanaayeen markii dambiga la galay, ama ka dib marka xeryaha lagu abaabulaka.

2. lama samayn karo hakinta dacwadda marka:

a) dambigu keenayo xukun dil aha;

a) dad kale ay dambiyadaas kala qaybgaleen ama ay gacan ku siiyeen, oo ay tahay in ay ku jiiraan xabsi ku-meelgaara;

b) eedaysanaha lagu qaadayo xitaa dambi kale, ee ka duwan ka xayuuubinta huga iyo hubka ciidanka.

3. Hakinta waa laga noqonayaa, haddii eedaysanaha ay ka joogsato shaqada uu ka hayay xerada uu ku tirsanaa.

4. Axkaamta la soo sheegay xitaa waxa la dabbaqayaa marka ay xiriir la leeyihiin dacwado kale ee ciqaab ee lagu qaadayo kuwa amarka diida, ka baaqsada ama banneya shaqada, si kutalagala dalka uga baxa ama laga dhoofiyo.

5. Hakinta dacwadda ma horjoogsanayso fulinta arrimaha deg-degga.

**64.** *Dabbaqidda xeerarka habka ciqaabta ciidaamada ee nabadda.* – Inta lagu jiro xaaladda dagaalka, waxaa la iaalinayaa haddii ay suurtgal tahay, axkaamta ku saabsan hababka ciidamada ee nabadda, haddii buugggan isaga aan si ka duwan loogu xusin.

## Cutubka 2aad

Dacwadda Ciqaabta

**65.** *Bilawga habraacyada dacwadaha ciqaabta oo iqtisaaskooda ay leedahayMaxkamadda Ciidamada ee Dagaalka.* – 1. Daacwadda ciqaabta waxay bilaabanaysaa oo la qaadayaa marka la helo amar uu soo saaro Taliyaha Sare, ama sarkaal sare oo isagu soo wakiisho, daraja ahaanna aan ka hoosayn Gaashaanle Sare ama u dhigma.

2. Dacwadda ciqaabta waxay ku bilabamaysa amar uu soo saaro Taliyaha Sare haddii dambiilihu

uu yahay jeneraal ama sarkaal darja ahaan u dhigma.

**66.** *Dacwadda ciqaabta liddi ku ah Taliye dagaal ama liddi ku ah dambiilayaal dambiyo liddi ku ah xeerka iyo dhaqamada dagaalka.* – Dacwadda Ciqaabta liddi ku ah taliyeyaasha falalka ay galeen muddada ay ku guda jireen xaaladda dagaalka, lama bilaabi karo, ka dib joogsiga xaaladda dagaalka, haddii aan amar laga haysan Wasiirka Gaashaandhigga.

**67.** *Dacwadda ciqaabta liddiga ku aha dadka ka tirsan ciidamada cadowga.* – Dambiyada liddiga ku ah xeerka iyo dhaqamada dagaalka, ee lagu galo dalka Soomaaliya laguna waxyeelleeyo cid kasta, amse dalka dibaddiisa oo lagu waxyeelleeyo ciidamada qalabka sida ee Dawladda Soomaaliya ama kuwa iyaga ka tirsan, ayna geystaan askar ama dad kale oo ka tirsan ciidanka cadowga, dacwadda ciqaabta, waxaa la oogi karaa ama lagu socodsiin karaa, hadddii xitaa isla dambigaas lagu qaaday xukun garsoore ajnabi ah; marka laga reebo arrimaha heshiisyo caalamiya looga gaaray.

## CINWAANKA SADDEXAAD

Axkam gaar ah

**68.** *Muddada lagu qaadan karo cabashada wax lagu burin karo.* – Inta lagu jiro xilliga dagaalka, muddada lagu soo gudbin karo cabashada wax lagu burin karo ee Maxkamadda Sare waa saddex cisho.

**69.** *Muddada fulinta xukunka dilka.* – Xukunka ciqaabta dilka, oo ay ku dhawaaqdo Maxkamadda Ciidamada ee dagaalka, wuxuu noqonayaa mid la fulin karo ka dib marka ay ka soo wareegto 24 saacadood dhawaaqidda, iyo marka cabasho burinta, la oggolyahay, islamarkaana ay ka soo wareegto 24 saacadood wargalinta diidmada cabashada.

2. Haddi xukumanuhu uu yahay maxbuus dagaal, waxaa la ilaaliyaa xeerarka heshiisyada caalamiga.

**70.** *Awoodda sharciyeynta.* - Wasiirka gaashaandhiggu wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro qodobbada sharci ee lagama maarmaanka u ah fulinta Xeerka Nidaamka Ciqaabta ee Militeriga ee Nabadda iyo Dagaalka.